Somalia (Kiis Gaar Ah)

Soomaaliya waxa ay ku jirtaa kiis gaar ah sanadkii 19 oo xiriir ah. Wadanka weli waxaa ka sii socday xaalaado gaamuray, amaan daro, iyo dhibaato xagga bini'aadminimada ah mudada ay warbixintu ka hadleyso iyada oo cudurka COVID-19, uu sii adkeeyey xaaladda uuna caqabad ku noqday hawlgalka NGOyada. Dawladda Federaalka ee Soomaaliya (FGS) waxa ay gacanta ku heysaa magaalo madaxada, Mogadishu, iyada oo Maamul Goboleedyada Federaalka (FMS) Xubnaha Ka ah ay gacanta ku hayaan degaanada ay maamulaan wadanka oo dhan. Dawladda goonideeda isu taagtay ee Somaliland iyo gobolka Puntland ee FMS waxa ay gaacnta ku hayeen amaanka iyo ciidamada nabadgelyada ee dhulka ay maamulaan. DFS saameyn kooban ayey ku leedahay dhulka ka baxsan Muqdisho. Kooxda argagaxisada al-Shabaab waxa ay sii wadeen in ay gacanta ku hayaan dhulka baadiyaha ah iyaga oo sida ay doonaan ugu kala socda dhulalka kale, oo ay ka mid yihiin koonfur-dhexe ee Soomaaliya. Kooxdu waxa ay awood u sheegtaan dadka degaanka iyaga oo ka ururiya canshuur , weerar aan kala sooc laheyn ku qaada dadka rayidka ah iyo agabka kaabayaasha dhaqaalaha ee wadanka, oo gacan ka geysta tahriibka dadka. Kooxda falaagada ah ee al-Shabaab waxa ay caqabad la taaban karo ku noqdeen awoodda dawladda ee ka hortagga tahriibka dadka. Dawladdu waxa ay ku dadaashay horumarinta nidaamka garsoorka iyo baaritaanka dawcadaha fal dambiyeedka si wax looga qabto fal dambiyeedka; hase yeeshee, waxa ay ku lamaanisay tahriibka dadka iyo dhuumaaleysi ku gelinta qaxootiga taasoo gaabis ka dhigtay dadaalka joojinta tahriibka dadka. Guud ahaan, dawladdu waxa ay ka sii waday gobolada oo dhan dadaal kooban oo lagu maxkamadeynayo, lagu ilaalinayo oo lagaga hortagayo xuquuqda aadanaha sanadka gudihiisa

DADAALKA DAWLADDA

DFS, maamulada Somaliland, iyo Puntland waxa ay sii wadeen dadaal kooban ee ku jeeda la dagaalanka tahriibka dadka mudada warbixintu ka hadleyso. Ciiidanka nabadgelyada, xeer ilaalinta, iyo saraakiisha garsoorka waxa ay ahaayeen kuwo aan ku filneyn oo aan laheyn tababar ku filan iyada oo tayada iyo dhaqan gelinta la dagaalanka tahriibku tahay mid gaabis ah. DFS ma aheyn xeyndaab xagga shariga ah oo wax looga qabto tahriibka dadka. Sharciga ciqaabta ka hor 1991—ee dhaqangalka ahaa heer gobol iyo dawlada federaalka—waxa uu ciqaab adag dusha ka saaray tahriibka iyo u adeegsiga galmoodka. Qodobka 455 waxaa uu

mamnuucanayaa oo ciqaab adag dusha ka saarayaa adoonsiga, kaasoo ciqaabtiisu tahay 5 ilaa 20 sano oo xarig ah. Qodobka 464 waxa uu mamnuucayaa qofka oo xoog loogu shaqeysto kaasoo ay ciqaabtiisu tahay lix bilood ilaa shan sano oo xarig ah. Qodobka 457 waxa uu mamnuuc ka dhigayaa wareejinta, qadidda, afduubka iyada oo qofka lagu helo dambi noocaas ah ay ciqaabiisu noqoneyso sadex ilaa 12 sanoo oo xarig ah. Dhamaan ciqaabahaas waa kuwo aad u adag oo ku filan. Qodobka 408(1) waxa uu mamnuuc ka dhigayaa dhileysiga rabshadaha wata ama handadaadda, kaasoo qofka la yimaada ay ciqaabtiisu tahay laba ilaa lix sano taasoo ah ciqaab ku filan laakiin uma dhiganto dadka la yimaada fal dambiyeedka foosha xun, sida kufsiga. Dastuurka ku meel gaarka ah waxa uu mamnuucayaa adoonsiga, ku shaqeysiga xoogga ah, tahriibka sida uu dhigayo Qodobka 14. Qodonka 29(6) ee dastuurka ku meel gaarka ah waxa uu mamnuucayaa u adeegsiga caruurta ee dagaalada hubeysan. Intii lagu jirey Sebteemeber 2017, Soomaaliland waxa ay ayiday sharci qabyo qoraal ah oo ku saabsan dadka tahriibinta looga faa'iideysto, kaas oo la sameeyay iyada oo lala tashaday ururo caalami ah; inkasta oo tiro wasaarado ah oo ay khuseeyso ay ayideen sharciga qabyo qoraalka ah, Baarlamaanka Somaliland ma aanay ansixin dhamaadkii xiliga warbixinta iyada oo ay ugu wacneyd khilaafaad ka jiray dhowr qodob. Intii lagu jiray Nofeember 2017 Puntland waxa ay ansixisay qaabka sharciga ka faa'iidaysiga tahriibinta dadka ka dib sadex sano oo la tashiyo ay la sameeysay ururo caalami ah. Qaab sharciyeedka waxa uu ka koobnaa xeer ciqaabeed cusub iyo xeer habraac dambiyeed iyo sharci si gaar ah u mamnuucaya tahriibinta dadka looga faa'iideysto; hase yeeshee, hay'adaha caalamiga ah waxa ay weli soo sheegayaan in aan la dhaqan gelin sharciyada la dagaalanka tahriibka dadka.

Si la mid ah sanadihii hore, ma jirin tirakoob ay soo saareen Dawladda Federaalka iyo maamul goboleedyada oo sheegaya baaritaanada tahriibka dadka ama dad lagu helay dambi noocaas ah. Mudada warbixintan ee sanadkan Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed (FGS), Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud (XIG) ayaa la soo wariyay in ay u xireen 479 qof tahriibinta ka faa'iidaysiga dadka oo uu ku lug lahaa tahriibiyayaal kuwaas oo dhib ka soo gaaray dad aan la garaneyn, marka lala baradhigo 17 qof oo loo xiray 2019 Xeer Ilaaliyaha Guud (XIG) ayaa wariyey in 129 ka mid ah dadka la soo xiray ay yihiin dad isku dayey in ay u safraan Turkiga iyaga oo wata baasboor aan rasmi aheyn; dawladdu ma aanay soo bandhigin macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan in dambiga lagu helay ama adeeg loo qabtay dhibanayaasha. Maamulka Somaliland ma aanu soo warin wax talaabo ah oo la xiriirta fulinta sharciyada la xiriira tahriibka dadka mudadan, marka lala

bardhigo in xabsiga loo taxaabay lix qof oo lagu soo eedeeyey tahriibka dadka sanadkii 2019kii. Intii lagu jiray Luulyo 2020kii ayaa magaalada Garoowe—magaalo madaxda Puntland— ayaa baaritaan ku sameeyey dacwad ku saabsan shaqaale Bangaladeesh ah oo xoog loogu shaqeystay dhismaha taasoo aheyd dacwad la soo gaarsiiyey booliska; dawladdu ma aanay soo werin wax faahfaahin oo ku saabsan natiijada baaritaanka. Dawlad goboleedka Puntland waxa ay soo weriyeen laba dacwadood oo la xiriira tahriibka dadka mudadan, marka lala bardhigo hay'adaha caalamiga ah oo laba dacwadood oo la xiriira tahriibka dadka oo lagu soo eedeeyey lix qof sanadka 2019. Dawladdu ma aanay soo sheegin haddii ay jiraan dacwado la diiwaan geliyey sanadka 2020 iyo 2019. FGS, saraakiisha Somaliland, Puntland ma aanay soo sheegin wax macluumaad ah oo ku saabsan dacwado furan ee mudada kor lagu soo sheegay. Dawladdu ma aanay soo sheegin wax baaritaan ah, maxkamadeyn ah, ama dambi lagu helay shaqaale dawladeed oo gacan ka geystay tahriibka dadka, oo ay ka mid yihiin shaqaale la shaqeynayey dadka tahriibka dadka ku shaqeysta, saraakiisha ciidamada, ee caruurta u adeegsada dagaalada, hase yeeshee, musuqmaasuqa iyo saraakiisha ka qeyb qaata fal dambiyeedka tahriibka dadka waa mid weli dareen ka taagan yahay, taasoo keentay dadaal ay qaadaan ciidanka nabadgelyada. Ciidanka Booliska Soomaaliyeed (CBS) Waaxda Dambi Baarista waxa ay abuurtay cutub qaabilsan la dagaalanka tahriibka, oo ay taageerayaan ururada caalamiga ah, iyo baaritaanka waajibka ah dacwadaha la xiriira fal dambiyeedka fal dambiyeedka oo u baahan ciidan iyo shaqaale dheeraad ah. Cutubkan ma aanu soo sheegin arrintaan la xiriirta tahriibka dadka sanadkii labaad oo xiriir ah, marka lala barbardhigo 43 baaritaan ee 2018. Goob joogayaashga ayaa horay u soo wariyey in SPF ay si joogta ah u fuliyaan hawlaha cutubka la dagaalanka tahriibka dadka iyo hawlaha kale oola xiriira tahriibka. Mudada warbixintan ka hadleyso, hay'ad caalami ah ayaa tababar u fidisay hay'adaha bulshada ee ka hawlgala gobolka, iyo sidoo kale ilaa shan sarkaal, oo garashada aqoonsiyada iyo gargaarka dadka u nugul qaxootiga, oo ay ka mid yihiin tahriibka dhibanayaasha. Tababarada ay taageeraan deeq bixiyayaasha dibadda ee ciidanka booliska ee baaritaanada iyo maxkamadeynta dacwadaha tahriibka iyo tabarada dadka loo qorto booliska iyo NGOyada ee la xiriira tahriibka iyo hijrada.

Si la mid ah sanadihi hore, dawladdu si nadaamsan uma aanay soo ururin ama warbixin ugama soo saarin tirakoob dhibanayaasha tahriibka iyo warbixintu waxa ay noqotay arrin lagu madadaasho. Ma jirin hay'ad dowladeed oo leh hab nidaamsan oo lagu garto ama loogu gudbiyo dhibanayaasha tahriibinta khasabka

ah adeegyada lagu ilaalinayo, waxa ayna dhamaantood ugu tiirsanaayeen si buuxda ururo caalami ah iyo NGOyada. FGS ma aanay heysan maaliyad ku filan oo ay adeeg toos ah ugu qabato ama ku taageerto hay'adaha caawiya dhibanayaasha iyo dadka nugul. Ciidanka nabadgelyada ee gegida diyaaradaha ee SFP ayaa soo sheegay in ay aqoonsadeen ilaa shan dhibane oo caruur la tahriibinayey—afar gabdhood waxaa loo dhoofinayey Kenya halka gabar kale, oo ay la socdaan waalidkeed loo dhoofinayey Imaaraadka carabta; ma aanay caddeyn in dadka caruurta dhoofinayey ay ka faa'iideysanayeen ama ahaayeen kuwo galmoodka loo isticmaalayo ama xoog loogu shaqaysanayo. Saraakiisha Puntland ayaa sheegay in ay aqoonsadeen 324 oo ahaa dad la tahriibinayey sanadka 2020; sida ay sheegayaan warar laga soo xigtay warbaahinta, waxa ay dawladdu aqoonsatay 150 oo dhibanayaal ah Bosasso iyada oo 324 dhamaantood ahaayeen caruur. Ururada caalamiga ah ee samafalka NGO ayaa gaarsiiyey Hay'adda Socdaalka iyo Ilaalinta Xuduudaha ee Somaliland laba bas oo siday dad qaxooti ah lagana yaabo in ay ahaayeen dhibanayasha tahriibka kuwaas oo laga soo qabtay dhulka fog ee cidlada ah si loogu qabto adeegga ay u baahan yihiin. Dadka laga yaabo in la tahriibinayey waxa ay Somaliland u fidisay gargaar ay bixiyeen Hay'adda Caalamiga ah ee Qaxootiga (MRC) ee Hargeysa ilaa inta ay MRCku guuleysatay in ay dib ugu celiyaan qoysaskoodii, sidoo kale ayey MRC ka hirgelisay gobolka Boosaaso ee Puntland. Bishii Diseembar 2020, FGS waxa ay taageero ka heshay Hay'ad Caalami ah, taasoo ay MRC xafiis ka furatay Muqdisho. MRC ma taageerto oo kaliya dhibanayaasha tahriibka ee waxa ay si guud adeeg ugu fidisaa dadka qaxootiga ee kala duwan. Dawladda iyo Ururada Caalamiga ah ma aanay soo saarin warbixin cadeyneysa tirada dhibanayaasha gargaarka ka helay MRC mudada warbixintu ka hadleyso; hase yeeshee, dawaladdu wax ay sheegtay in dadka xagooda loo soo diray ay ugu wacan tahay MRC oo awood u weysay sida shaqaalaha iyo adeegyada kale oo ku yar, taasoo ka dhalatay cudurka dilaacay. Maamul goboleedka Puntland waxa ay sii wadeen hab ay taageero uga raadinayaan dhibanayaasha ururada caalamiga ah; hase yeeshee, saraakiishu ma aanay sheegin inta ay taasi le'eg tahay mudada ay warbixintani ka hadleyso. Daryeelka dhibanayaashu waxa uu ahaa mid si aad ah u kala duwanaa wadanka oo dhan iyo qaar takhasusyaasha gaarka ah sida (la talinta caafimaadka maskaxda) oo aan jirin iyada oo ay ugu wacneyd yaraanta xirfadlayaal u qalma gudaha wadanka. Dawladdu si joogta ah ayey u xirtaa dhibanayaasha jabiya sharciyada socdaalka, oo ay ka mid tahay fiisayaal been abuur ah,; hase yeeshee, waxa ay dawladdu sheegtay in dadka la xiray qaarkood lagu sameeyey baaritaan in ay yihiin dhibanayaal halka ay ka soo galayeen waddan, gaar ahaan Muqdisho. Dawladdu

ma aanay la imaan wax lagu bedelo in waddanka laga saaro dhibanayaasha tahriibka ee Soomaalia ee wadamada laga yaabo in ay cadaawad iyo dhibaato kala kulmaan.

Maamulada Soomaaliya oo dhan dadaalka ay kaga hortagayaan tahriibka waxa uu aha mid kooban intii lagu jiray sanadka oo dhan. Sarkaalka ugu sareeya ee la dagaalanka tahriibka waxa ay aheeyeen kuwo ku magacaaban wakiilka gaarka ee xaquuqda caruurta iyo qaxootiga, kaasoo horay shaqaale uga ahaa xafiiska ra'iisul wasaaraha waxaana mas'uulka ahaa isku dadaalka qaxootiga, tahriibka, iyo wada shaqeynta hay'adaha Dawladda Federaalka ee dhulka dawladdu gacanta ku heyso. Goob joogayaal ayaa tilmaamay in doorka ergeyga gaarka uu ahaa mid hoos loo dhigay inta lagu jiray mudadan Iyada oo Xafiiska Ergeyga Gaarka Ah uu u dhigmo jago wasiir ah, wasiirka FGS ee Haweenka Iyo Xuquuqda Aadanaha iyo wakiilo ka socda Galmudug ayaa horey ula wadaagay hogaanka sare ee guddi xagga farsamada ah ee loo xilsaaray wax ka qabashada tahriibka. Gudiga waxa uu ahaa mid aan shaqeyneyn mudada warbixintan, iyagoo horay u qabtay kulamo bishiiba mar ah sanadkii 2019kii. Jiritaan la'aanta khubaro xagga farsamada ah iyo awoodd gudiga oo kooban darteed waxa ay gaabis ka dhigtay dadaalka iyo dhaqan gelinta sharciyada la dagaalanka tahriibka. Somaliland, Wasaaradda Garsoorka, oo kaashanaysa hay'ado caalami ah waxa ay abuurtay guddi isku dhaf ah oo la socda hawalaha tahriibka; hase yeeshee, saraakiishu ma aanay soo sheegin wixii u hirgalay ee la dagaalanka tahriibka. Puntland, waxa ay dawladdu abuurtay gudi ka kooban dhawr wasaaradood oo u xilsaaran hijrada iyo Gudiga La Dagaalanka Tahriibka ee Pintland; hase yeeshee, saraakiishu ma aanay soo saarin hay'adaha u xilsaaran joojinta tahriibkan mudada ay warbixintu ka hadleyso. Sanadkii 2019, Xafiiska Ergeyga Gaarka ah ayaa diyaariyey istaraatiijiyad, qorshaha qaranka (NAP) oo u kala saaray sadex darajo, sharciyada, wada shaqeynta, iyo wacyi gelinta.; hase yeeshee, dawladdu ma aanay soo saarin warbixin muujineysa dhaqangalka (NAP) ka dib markii xilka laga qaaday ra'iisul wasaaraha Luulyo 2020. FGS ma aanay soo saarin warbixin muujineysa in la qabtay ololaha wacyi gelinta mudada ay warbixintu ka hadleyso, marka lala bardhigo laba olole oo si gaar ah loola beefgsaday shaqaalah gurmadka sanadkii 2019. Dawladdu ma aanay dhaqan gelin khadka telefoonka ee mudada ay warbixintu ka hadleyso. Maamulada ka jira Soomaaliya oo dhan ma aanay sameyn dadaal la taaban karo si loo yareeyo kuwa ka faa'iideysto ganacsiga xagga galmoodka. Dawladdu ma aanay qaban wax tababar ah oo ku saabsan ka hortagga tahriibka ee shaqaalaha diblumaasiyiinta ah. Soomaaliya xubin kama aha Baratakoolka 2000 UN TIP

Xaaladda amaanka oo ka sii dareysa iyo xayiraadda dhaqdhaqaaqa ee gargaarka bini'aadminimo ayaa caqabad ku noqday dadaalka loogu jiro in la joojiyo qorashada caruurta iyo u adeegsiga ciidamada. Al-Shabaab ayaa sii waday in ay geystaan inta ugu badan ee xadgudubka, inkasta oo ay jiraan warbixino sheegaya in ciidamada dawladdu ee gaashaandhigga iyo booliskuba — oo ka mid yihiin Ciidamada Qaranka (SNA) iyo SPF — Ciidamada Puntland iyo Booliska, Ciidamada Jubaland, Ciidamada Galmudug iyo Booliska, ciidamada Dawladda Federaalka iyo kuwa gobolada, iyo kooxaha hubeysan ee qabiilada si sharci daro ah ciidamada ugu qortaan caruurka kooban gabdho iyo willal (da'doodu u dhaceyso 10 ilaa 17 sano jir). Hay'ad caalami ah ayaa xaqiijisay in ciidamada loo qortay 213 caruur ah (oo ay ka mid yihiin 12 gabdhood) ee dhamaan dhinacyada kala duwan intii u dhaxeysay Abriil ilaa Juun 2020; 532 caruur ah (oo ay ku jiraan 12 gabdhood) intii u dhaxeysay Juun ilaa Siteembar 2020; iyo 426 caruur ah (oo ay ku jiraan 15 gabdhood) mudadii u dhaxeysay Oktoobar ilaa Diseembar 2020. Mudadii hore ee warbixintan, hay'ado caalami ah ayaa diiwan gelisay u qorashada ciidamada ee 710 caruur ah. Sida laga soo xigtay hay'adda caalamiga ah, kuwa raacsan maamulada iyo kuwa aan raacsaneyn ee lagu xusay warbixinta ayaa 67 boqolkiiba caruurta u adeegsada ujeedooyin aan la garaneyn goobaha dagaalka; 22 boqolkiiba waxa ay caruurta u adeegsadaan iska hor imaadka dagaalka, iyada oo 11 boqolkiiba u adeegsadaan gargaarka ciidamada sida kuwa ilaalada ah, baraha koontaroolka qaadista fariimaha iyo nadaafadda. Mudada ay warbixintan ka hadleyso, waxa ay goob joogayaashu soo sheegaan in ay jiraan sadex xaaladood oo ciidamada amaanku ay u qorteen caruurta (laba will iyo gabar) in ay ilaaliyaan dhismayaasha iyo saraakiisha dawlaadda ee Muqdisho.

Dawladduu waxa ay sii waday in ay dhaqan geliso qorshe hawleedkii 2012 ee lagu soo afjarayey u qoroshada ciidamada ee caruurta ee xoogga dalka Soomaaliyeed SNA; hase yeeshee, FGS waxa ay soo saartay amaro kala duwan iyo xakameynta ciidanka SNA. Waaxda Badbaadada caruurta ee wasaaradda Gaashaandhigga (CPU), oo kaashanaya hay'daha caalamiga ah iyo kuwa deeqda bixiya, ayaa sheegay in ay baaritaan ku sameeyeen 4899 SNA ee shaqaalaha Galmudug, Gobolka Koonfur Galbeed, Jubaland, iyo Moqdisho. CPU ma aanay soo sheegin caruur loo qortay ciidamada, laakiin waxa ay aqoonsadeen oo ay soo qabteen 11 caruur ah oo ay al-Shabaab ay u qorotay ciidamada qaarkoodna loo wareejiyey in la siiyo gargaar dheeraad ah. Iyada oo lala kaashanayo hay'adaha caalamiga ah ee aan dawliga aheyn, NGO iyo CPUdu waxa ay sii wadeen in ay qabtaan tababaro iyo olole wacyi gelin oo loo qabtay boqolaal ka tirsan ciidamada

iyo hogaamiyayaasha bulshada si looga hortago in caruurta ciidanka loo qorto oo loo isticmaalo ciidanka mudada ay warbixintu ka hadleyso. Hay'adaha caalamiga ah ayaa sii waday in ay soo wariyaan qaar ka mid ah ciidamda dawladda oo xabsiga u taxaabay ilmo yaryar ka dib markii lagu tuhmay in ay xiriir la leeyihiin al-Shabaab kuwaas oo aan lamarin nidaamka garsoorka ee caruurta ama aan la raacin sharciyada caalamiga ah. Gaar ahaan, laga bilaabo Abrill ilaa Siteembar 2020, hay'ad caalami ah ayaa soo warisay in ciidamada amaanka ee Dawladda Federaalka ee Soomaaliya (u badan booliska) ay xireen oo xabsiga ku hayeen 108 caruur ah (oo ay ku jirto hal gabar) oo da'deedu ay u dhaxeysay 11 ilaa 17 jir ka dib markii sida la sheegay la socdeen kooxaha hubeysan. Sida la soo wariyey, waxa ay saraakiishu xabsiga ka sii daayeen 61 caruur ah, iyada oo 46 caruurtu ka mid ah weli xabsiga ku jireen; xaaladda hal wiilna aan la ogeyn.

Bilowgii 2019, hay'ad caalami ah ayaa taageertay kulanka la tashiga ee Soomaaliya ee istaraatiijiyadda iyo hawlgalka wada shaqeynta ee ka hortagga iyo u gurmadka caruurta, sii deynta, iyo dib ugu celinta qoysaskooda; istaraatiijiyaddu waxa ay diyaar u aheyd in la ogolaado markii labaad ee mudada ay warbixintu ka hadleyso. Dadka Soomaaliyeed intooda badan ma heystaan shahaadada dhalashada, iyada oo uusan jirin nidaam dhalashada caruurta lagu diiwaan geliyo ama daweeyo, taaoo adkeysay in la cadeeyo da'da caruurta loo qorto ciidamada. Sanadkii 2018, FGS waxa ay bilowday nidaamka diiwaan gelinta ee ciidamadaSNA si loo aqoonsado, loogu sameeyo lambar, degaan, xisaab lacagta loogu shubo, iyo diiwaan gelinta hubka si loo kordhiyo isu laab furnaanta iyo la xisaabtanka ciidanka qalabka sida loogana hortago qorashada ciidamada iyo u adeegsiga ciidanka ee SNA. Dawladdu ma aanay soo saarin warbixin ku saabsan dhaqan gelinta nidaamka diiwaan gelinta markii labaad oo xiriir ah mudada ay warbixintu ka hadleyso, inkasta oo ls sheegay in qeybo ka tirsan SNA ay iska diiwaan geliyeen barnaamijka.

TAARIIKHDA DHUUMAALEYSI KU GELINTA

Sida la soo wariyay shantii sano ee la soo dhaafay, dadka khasabka wax ku tahriibiya waxa ay ka faa'iideystaan dhibanayaasha gudaha iyo dibada ka yimid gudaha Soomaaliya, sidoo kale kuwa khasabka wax ku tahriibiya waxa ay dibada Soomaaliya uga faa'iideystaan dhibanayaal ka yimid Soomaaliya. Warbixinada ku saabsan qaabka tahriibinta khasabka ah iyo dhibanayaasha ku sugan gudaha Soomaaliya waa mid dhib badan in la helo ama la cadeeyo. Afar meel oo looga gudbo xaduuda oo ay ka muuqato dhaqdhaqaaqa muhaajiriinta ayeey sida badan

kuwa xooga wax ku tahriibiya isticmaalaan sida:wadada waqooyiga ee ku sii jeeda Yurub iyada oo la sii marayo Liibiya, wadada bari ee ku sii jeeda Yurub oo la sii marayo turkiga; dariiqa tooska ah ee koofurta ee sii mara Keenya,Tansaaniya, ama Koofur Afrika, iyo ugu dambeeyntii koofurta bartamaha Soomaaliya oo la sii marayo Puntland kuna sii jeeda Yaman iyadoo la sii marayo gacanka Baabul Mandab. Intii lagu jiray mudada warbixinta saraakiishu waxa ay soo wariyeen kor u kac ku yimid tahriibka ee dariiqyada Bariga iyo Koofurta. Gudaha Somaliland haweenka ayaa ah kuwo soo qora iyo dulaal si loogu sii qaado dhibanayaasha Puntland, Djibouti, iyo Ethiopia iyada oo ujeedadu tahay in laga dhigto ku adeega guryaha ama loo tahriibiyo galma ahaan. Iyada oo aysan jirin tirooyin sugan, mudadii hore ee warbixinta FGS waxa ay sheegtay in tiro ahaan Somali yar ay gaaran wadamadii ay ku sii jeedeen laakiin ay ku xanibmaan wadamada ay sii maraan. Cadeyn aan la tirin ayaa mala awaasha in al-Shabaab ay siii wado fududeeynta dambiyada tahriibinta dadka , iyaga oo isticmaalaya marin habaabin , in ay dhax galaan dugsiyada iyo masaajidyada, iyo iyaga oo ku khasba odayaasha in ay qortaan ugu dambeeyntana ku qasba dhibanayaasha oo ay ku jiraan caruur iyo inta badana ka keenaya koofurta-bartamaha Soomaaliya iyo Kenya iyaga oo galinaya dhileysiga xagga galmada, kaalin taageero ciidan, dagaal galin toos ah iyo in loo guuriyo maleeshiyaadka al-Shabaab. Sanadkii 2018, waxaa la soo sheegay in al-Shabaab ay qabteen xaflad "wareejin ah" oo ay ka soo qeyb galeen xaafadaha iyo kaabo qabiilada, kuwaas oo kooxaha argagixisada ah ay ku khasbeen "in ay huraan" boqolaal caruur in ay dagaalada ka qeyb qaataan. Al Shabaab waxa ay sii waday in ay qafaasho tiro aan la garaneyn oo gabdho yaryar ah oo lagu qasbo in ay guursadaan ama loo adeegsado galmoodka mudada ay warbixintani ka hadleyso.

Dadka ka barakacay gudaha, qaar ka tirsan dad laga tiro badanyahay jinsiyad ahaan, dadka degan dhulka ay al-Shabaab maamusho iyo dhalinyarada ayaa ah kuwa ugu nugul tahriibinta xagga galmada iyo in xoog loogu shaqeeysto. Mudada ay warbixintan ka hadleyso, dawladdu waxa ay dawladdu diiwan gelisay in dadka qaxootiga ee nugul ay da'doodu ka yar tahay sanadihii hore, oo qaarkood da'doodu tahay 15 sano. Mudada warbixinta caruurta ka shaqeeya meheradaha aan rasmiga aheyn ayaa khatar weyn ugu jira in la tahriibiyo iyadoo inta badan ay ku kalifto cadaadis qoys iyo dhaqaale si ay shaqo uga raadsadaan dibada. Muhaajiriintaas dhaqaale doonka ah waxa ay mararka qaar galaan deyn shaxda loogu yeero " hadda bax hadhow bixi" ama ka faa'iideysi xagga dhaqaalaha ah. Sida laga soo xigtay urur caalami ah kuwa wax tahriibiya waxa ay baad lacageed ka qaadaan qoysaska ay ka tageen dadka tahriibaya iyaga u hanjaba hadii ay diidaan ama ay

bixin waayaan. Guud ahaan waxyaalaha ugu waa weyn ee ku khasba muhaajiriintu in ay ka tagaan Soomaaliya waa faqriga, amaan darida iyo masiibooyinka dabiiciga ah Bishii Febraayo ee 2021kii, urur Caalami ah ayaa diiwaan galiysay wax ka badan 900,000 oo qaxooti ah iyo 2.6 Milyan oo ah barakacayaasha gudaha Soomaaliya Qaar ka mid ah Soomaalida ayaa iyagoo ogol ku wareejiyaan masuuliyda caruurtooda dad ay wadaagaan xiriir dhalasho ama ay isku qabiil yihiin, qaar ka mid ah caruurtaas ayaa laga yaabaa in ay noqdaan dhibanayaal xoog loogu shaqeeysto ama loo tahriibiyo galmo ahaan. Iyada oo caruur badan ay ka shaqeeyaan gudaha guryahooda ama meheradaha qoyskooda, waxaa laga yaabaa in qaar caruurta ka mid ah lagu qasbo shaqooyinka beeraha, howlaha guriga, ilaalinta xoolaha, iibinta iyo xamaalida jaadka, jajabinta dhagxaha, ama howlaha dhismada. Inkasta oo aysan jirin tirakoob lagu kalsoonaan karo Somaliland iyo Puntland waxa ka sii socotay in ay yimaadaan qulqul muhaajiriin dhaqaale doon ah iyo qaxooti ka yimid dalka dagaalku baabiyay ee Yaman iyo Gobolka Oromiya ee Itoobiya mudada warbixinta.Waxaa taas raaca in gunaandka mudada warbixinta ay Masuuliyiinta Puntland ay taakuleeyeen qiyaastii 7,500 muhaajiriin iyo Somali ka soo laabatay oo sida badan ka imaanaysay Yaman, Sacuudi Carabiya iyo Itoobiya.

Sida badan shabakadaha wax tahriibiya waxa ay ka koobanyihiin Soomaali, Jabuutiyaan,Eriteriyaan iyo tahriibiyayaal ka socoda Waqooyiga Afrika. Sida caadiga ah kuwa wax tahriibiya wax ay adeegsadaan marin habaabin oo ah qaabka ugu weyn ee dadka ku qaataan, inkasta oo al-shabaab sida badan ay isticmaalaan Khasab iyo xoog. Kuwa wax tahriibiya waxa ay dadka ka qortaan baraha bulshada ee internetka iyo hay'adaha safarka, iyaga oo noqday shabakad isa soo tareysa oo sii adkaaneysa. Tiro sii kordheeysa ee kuwa wax tahriibiya ayaa bartilmaameedsada oo qorta caruurta iyada oo aanay waalidkood ka warqabin ama iyaga oo u sameeya balan qaadyo been ah oo ah in aan wax lacag ah laga rabin ilaa ay ka gaaraan halka ay u socdaan. Kuwa wax tahriibiya iyo kuwa dhuumaaleysiga dadka ku gudbiya ayaa la soo sheegay in ay ka faa'iideystaan nuglaashaha caruurt iyo haweenka barakacayaasha gudaha ah kuwaas oo sida badan ka yimid koofurta iyo bartamaha Soomaalida, iyaga oo maraka qaar isticmaalaya balanqaadyo been ah oo shaqooyin macaash leh gudaha Yurub iyo Waqooyiga Ameerika. Kuwa wax tahriibiya waxa ay kaxeeyaan haweenka Soomaalida iyago oo mararka qaar marsiiya jabuuti, una sii jeeda Bariga Dhexe iyaga oo si soo noqnoqota loogu isticmaalo adeega guryaha, xoog loogu shaqeeysto, ama tahriibinta galmada. Ragga Soomaalidu waxa ay muteen xaalado si Khasab ah looga shaqeeysto beeraha iyo dhismaha gudaha Wadamada Khaliijka. Kuwa wax tahriibiya waxa ay

caruurta u safriyaan Sacuudi Carabiya iyo Jabuuti waxa ayna ku khasbaan in ay ka tuugsadaan dariiqyada. Hay'ado shaqaaleyn ah oo been abuur ah ayaa gacan ka geysta tahriibka dadka iyaga oo bar tilmaameed ka dhigta dadka doonaya in ay shaqo ka helaan wadamada khaliijka.